# Waxbarashada la xoojiyay ee fasalka 7-aad ka bilaabmaysa

Waxbarashada la xoojiyay waa waxbaris xoogga lagu saarayo maaddo ama mowduuc gaar ah. Ardeygu maaddadaas ama mowduucaas xoogga loo saaray ayuu baranayaa in ka badan inta ay ardeyda kale dhiganayaan. Waxbarashada la xoojiyay ardeyda dhigata waxaa laga yaabaa in toddobaadkooda waxbarasho uu 1–2 saac ka badanyahay ardeyda waxbarashada guud dhigata.

Waxbarashada la xoojiyay waxaay bilaabmaysaa fasalka 7-aad. Dhammaan dadka xiiseynaya oo dhan waxaa u bannaan inay codsadaan waxbarashada la xoojiyay. Hiwaayad ama khibrad in hore maaddadaas loogu soo lahaa loogama baahna ardeyga. Haddii ardeygu uu rabo inuu waxbarashada la xoojiyay codsado wuxuu leeyahay imtixaanka doorashada marka uu fasalka 6-aad ku jiro. Imtixaanka doorashada waxaa lagu qiimeynayaa in ardeygu uu diyaar u yahay inuu barto waxbarashadaas la xoojiyay ee uu codsaday.

Imtixaanka doorashada ardeyda lagu doortay waxaa laga qaybgalin karaa kooxda waxbarasho ee waxbarashada guud, markaasna xiisadaha maaddada waxbarashada la xoojiyay waxaa lagu dhigayaa kooxda waxbarasho ee ardeygu uu ku jiro. Ardeyda lagu doortay imtixaanka doorashada waxaa sidoo kale laga koobi karaa koox waxbarasho oo gaar ah.

Macluumaad dheeraad ah oo khuseeya waxbarashada la xoojiyay iyo imtixaanada doorashada waxaa laga heli karaa bogga internetka ee dugsiyada (edu.hel.fi/kouluhaku) ama marka lala xidhiidho dugsiga bixinaya waxbarashada la xoojiyay.

---

## Awoodda soo jeedinta iyo matalaadda

Awoodda soo jeedinta iyo matalaaddu waa xirfad uu qofku wax ku soo jeedin karo ama ku matali karo. Waxaa awooddaas soo jeedinta iyo matalaadda lagu bartaa koox iyadoo ciyaar iyo matalaad loo adeegsado. Xiisadda soo jeedinta iyo matalaadda waxaa lagu tababartaa hadalka, dhaqdhaqaaqa iyo qoob ka ciyaarka, ruwaayadaha iyo muusiga. Waxaa la hiigsanayaa inuu ardeygu helo qaabka isaga ku haboon ee soo jeedin ama matalaad ah.

Imtixaanka doorashada waxaa ku jira casharo kala duwan oo soo jeedin iyo matalaad ku saleysan.

Xoojinta soo jeedinta iyo matalaadda waxaa lagu dhigan karaa dugsiga hoose-dhexe ee Kannelmäki.

## Maaddada maareynta howlaha guriga iyo jimicsiga

Ardeygu wuxuu cuntooyin u diyaarinayaa qaab caafimaad leh oo dhaqaale-wanaag leh, wuxuu u jimicsinayaa qaab noocyo badan wuxuuna jimicsi u suuro galinayaa ardeyda kale. Ardeygu wuxuu dalxiisyada iyo safarada gaaban ku baranayaa awoodaha loogu baahanyahay sida diyaarinta cuntada iyo dhex socodka dhirta dabeeciga ah. Ardeydu waxaay tababaranayaan qorsheynta iyo qabanqaabinta munaasabadaha jimicsiga. Waxaa waxbaristaas xooga lagu saarayaa jimicsiga nolosha maalinlaha, caafimaadka iyo khibradda ka lagu helo. Waxaa la hiigsanayaa inuu ardeygu barto sida uu u horumarinayo nolol-wanaaggiisa iyo ka dadka kale.

Imtixaanada doorashada waxaa ku jira casharo cabiraya awoodda uu ardeygu u leeyahay inuu qorsheeyo oo uu hago jimicsiga kooxaha loo qabto. Imtixaanka doorashada waxaa ku jira casharo qoraal ah oo maareynta howlaha guriga iyo nolol-wanaagga la xidhiidha.

Maaddada maareynta howlaha guriga iyo jimicsiga waxaa lagu dhigan karaa dugsiga Pohjoismainen yhtenäiskoulu.

## Farshaxan sawireedka

Ardeygu wuxuu ku jeedsanayaa oo uu aad u baranayaa qaababka kala duwan ee sawiro loo sameeyo. Sawiro waxaa loo sameeyaa iyadoo gacanta lagu sawiro, la ranjiyeeyo, la qaabeeyo, la dhiso iyo qalab dhijital ah iyadoo loo adeegsado. Ardeygu wuxuu qayb ka yahay bulshada dugsiga ee artistaha ah. Ardeydu waxaay ka qaybqaadanayaan wadashaqeynta maaddooyinka kala duwan ka dhex dhacda, mashruucyada farshaxanka iyo arts-ka waxaayna baranayaan waxyaabaha dhaqanka iyo suugaanta lagu soo jeediyay ee wakhtiga la socda.

Imtixaanka doorashada waxaa ku jira casharo kala duwan oo farshaxan iyo dhaqan iyo suugaan ku saleysan.

Xoojinta farhsaxan-sawireedka waxaa lagu dhigan karaa dugsa dhexe ee Meilahti, dugsiyada hoose-dhexe ee Aleksis Kivi iyo Porolahti, dugsiga wadajirka ah ee cusub ee Helsinki iyo dugsiga Helsingin yhteislyseo.

## Farshaxan sawireedka dijitaalka ah

Ardeygu wuxuu ku jeedsanayaa oo uu aad u baranayaa qaababka kala duwan ee sawiro loo sameeyo. Waxaa sawirrada lagu samaynayaa tusaale ahaan qalabka dijitaal ah, sawiraad, rinjiyayn, qaabayn iyo dhisitaan. Ardeygu wuxuu qayb ka yahay bulshada dugsiga ee artistaha ah. Ardeydu waxaay ka qaybqaadanayaan wadashaqeynta maaddooyinka kala duwan ka dhex dhacda, mashruucyada farshaxanka iyo arts-ka waxaayna baranayaan waxyaabaha dhaqanka iyo suugaanta lagu soo jeediyay ee wakhtiga la socda.

Waxaabaha lagu baranayo farshaxan sawireedka dijitaalka ah waxay la mid yihiin waxyaabaha lagu baranayo waxbarashada farshaxan sawireedka ee la xoojiyay, laakiin waxaa in badan waxbarashada loo isticmaalayaa qalabka dijitaalka ah, sida kambuyuutarada iyo tabletka.

Imtixaanka doorashadu waa mid la mid ah imtixaanka doorashada ee farshaxan-sawireedka, laakiin waxaa ku jirta hal cashar oo lagu cabirayo u diyaarsanaanta farshaxan-sawireedka dhijitalka ah.

Xoojinta farhsaxan-sawireedka dhijitalka ah waxaa lagu dhigan karaa dugsiga dhexe ee Meilahti.

## Af laatin

Xiisadaha afka laatinka waxaa lagu bartaa afka laatinka, taariikhdii antiiga ahayd iyo cilmiga griigga iyo ruum. Waxbarashadaas ardeygu wuxuu ku horumarin karaa aqoontiisa luqadeed ee laatinka, kaas oo taageeraya barashada afka hooyo iyo afaka kaleba. Barashada afka laatinku wuxuu si baaxad leh u taageerayaa fahamka erayada xadaaradda iyo dhaqanka. Waxaa latinka la bartaa isagoo ah luqadda B2 oo ikhtiyaari ah.

Imtixaanka doorashada waxaa lagu qiimeynayaa aqoonta afka finnishka. Dugsiga Helsingin normaalilyseo waxaa loo galaa imtixaan gaar ah.

Xoojinta afka laatinka waxaa lagu baran karaa dugsiyada Helsingin normaalilyseo, Herttoniemi iyo Töölö.

## Jimicsiga, qoob ka ciyaarka iyo soo jeedinta iyo mataaladda

Ardeygu wuxuu si xeel-dheer u baran karaa mowduuca uu isagu xiiseynayo: qoob ka ciyaarka, matalaadda, duubista filimaanta, farshaxan-sawireedka, gogol dhigista filimaanta, muusiga iyo teknolojiyadda soo jeedinta oo ay ku jiraan codka iyo nalalka loo adeegsado filimaanta iyo matalaadda. Fasalka 7-aad ardeyda dhigtaa waxaay baranayaan qaybaha kala duwan ee xoojintaas. Ardeyda dhigta fasalka 8-aad iyo 9-aad waxaay si xeel-dheer u sii barayaan mowduucyada ay iyagu xiiseynayaan.

Imtixaanka doorashada waxaa ku jira casharo waxqabad iyo halabuurnimo kala duwan loogu baahanyahay.

Xoojinta soo jeedinta iyo matalaadda waxaa lagu dhigan karaa dugsiga hoose-dhexe ee Pitäjänmäki.

## Jimicsiga

Jimicsiga waxaa lagu tababaranayaa noocyada jimicsi ee kala duwan iyo noocyada jimicsiga guud oo si baaxad leh loo baranayo. Ardeydu waxaay fursad u leeyihiin inay ka qayb-qaataan tababarka jimicsi ee Urhea lagu agaasimo intaanay u bilaaban maalinta dugsi iyo dugsiga markay ka soo baxaan dhowr maalmood oo toddobaadka ka mid ah.

Imtixaanka gelitaanka waxaa imtixaanka jimicsiga gudaha lagu cabirayaa awoodaha jimicsiga, xawaaraha, adkeysiga, awoodda, awoodda miisaanaanta, ridhimka, awoodda dhaqdhaqaaqa jidhka iyo awoodda isticmaalka qalabka.

Macluumaad ku saabsan imtixaanka waxaad ka helaysaa: www.soveltuvuuskoe.fi

Jimicsiga la xoojiyay waxaa lagu dhigan karaa dugsiyada hoose-dhexe ee Haaga, Itäkeskus, Laajasalo, Merilahti iyo Pakila, Puistopolku, Pukinmäki iyo dugsiga wadajirka ah ee Maunula.

## Isboortiga

Hiigsiga xoogsaaridda isboortigu waa in lagu taageero ciyaaryahanka tartamaya ee da'da yar isku wadidda ciyaartiisa isboortiska ah iyo dugsi-dhigashadiisa iyo korriinkiisa ciyaaryahanimo. Ardeydu waxaay ka qayb-qaadanayaan tababarada Urhea ay agaasimaan ee jidhka iyo ciyaaraha gaarka ah. Waxbarista waxaa loo qorsheynayaa qaab loogu suuro galinayo ardeyda inay ka qayb-qaataan tababrka jimicsiga ee subaxdii iyo galabtii.

Imtixaanka gelitaanka waxaa imtixaanka jimicsiga gudaha lagu cabirayaa awoodaha jimicsiga, xawaaraha, adkeysiga, awoodda, awoodda miisaanaanta, ridhimka, awoodda dhaqdhaqaaqa jidhka iyo awoodda isticmaalka qalabka.

Macluumaad ku saabsan imtixaanka waxaad ka helaysaa: www.soveltuvuuskoe.fi

Intaas waxaa dheer in ardeyga ay u bannaantahay inuu ka qayb-qaato imtixaanka qayb ka mid isboortis gaar ah. Macluumaadka imtixaanaadka noocyada isboortiga waxaa laga helayaa bogagga Urhea: www.urhea.fi

Dugsiyada jimicsiga ee Urheilyväylä waxaay haystaan darajada dugsiga Urheiluväylä ee ay bixisay Suomen Olympiakomitea.

Waxbarashada xoogga saaraysa isboortiiska waxaa lagu dhigan karaa dugsiyada hoose-dhexe ee Haaga, Pasila, Puistopolku iyo Oukinmäenkaari iyo weliba dugsiyada wadajirka ah ee Herttoniemi iyo Pohjois-Haaga.

## Bey'ada iyo cilmiga

Xoojinta bey'adda iyo cilmigu wuxuu taageerayaa barashada guud ee bayolojiga, kemistriga iyo fisigiska. Xoojintaasi waxaay ku habboontahay dhammaan ardeyda xiiseynaya dhirta, shaqada laga qabanayo shay-baadhka ama maaddada baadhitaanka xiddigaha. Ardeygu wuxuu si baaxad leh wax uga baranayaa mowduucyada kala duwan ee maaddooyinka sayinska. Waxbarashadaas waxaa loogu baxaa dalxiisyo iyo safaro gaaban, waxaa lagu baadhaa tusaale ahaan cirka iyo dhirta waxaana lagu tababartaa qaabka cilmi-baadhista loo sameeyo. Ardeygu wuxuu baranayaa sida uu qofku nawaaxigiisa u saameyn karo iyo nooca nolosha addunku ay u jirto.

Imtixaanka doorashada waxaa ka mid ah casharo dabaqaad u baahan oo ku saleysan mowduucyo sayinska ku sal leh oo kala duwan.

Xoojinta bey'adda iyo cilmiga waxaa lagu baran karaa dugsiyada hoose-dhexe ee Käpylä, Merilahti iyo Vesala.

## Xisaabta

Xisaabta wuxuu ardeygu ku xaliniyaa dhibaatoyin xisaabeysan wuxuuna si xeel-dheer u sii baranayaa xisaabta. Xisaabta way fiicantahay in lala barto dad kale oo xisaabta xiiseynaya. Xisaabta waxaa loo baranayaa si ka xeel-dheer fasalada kale.

Imtixaanka doorashada waxaa lagu cabirayaa aqoonta uu ardeygu u leeyahay casharada dhibaatada xisaabeed lagu xisaabinayo iyo casharada xisaabta ee hadal ahaan loo waydiinayo. Imtixaanka doorashada laguma isticmaali karo xisaabiye.

Xoojinta xisaabta waxaa lagu dhigan karaa dugsiyada hoose-dhexe ee Maunula, Munkkiniemi dugsiyada wadajirka ee Pohjois-Haaga iyo Töölö iyo dugsiga Helsingin yhteislyseo.

## Aqoonta xisaabta iyo sayinska

Ardeydu waxaay baadhayaan oo ay kuurgalayaan arrimaha ku sal leh sayinska. Waxbarashada waxaa qayb ka ah baadhitaano iyo booqashooyin waxbarasho. Heerarka kala duwan ee fasaladu waxaay leeyihiin mowduucyo u gaar ah oo maaddooyinka farshaxanka iyo cilmiga lagu dhigto. Fasalka 7-aad waxaa lagu baadhaa Badwaynta bariga waxaana laysku daraa bayoolaji iyo farshaxan-sawireed. Fasalka 8-aad waxaa dalxiisyo gaaban lagu sameeyaa keynta waxaana la bartaa fisigiska iyadoo jimicsina loo adeegsanayo. Fasalka 9-aad cuntaa la kariyaa waxaana la bartaa kemistari iyadoo laysku darayo xisaab iyo juyuqraafi.

Imtixaanka doorashada waxaa ku jira casharo kala duwan oo cilmi iyo xisaab xambaaran.

Xoojinta xisaabta iyo sayinska waxaa lagu baran karaa dugsiga dhexe ee Vartiokylä.

## Waxbarashada fahamka warbaahinta

Waxbarashada waxaa lagu tababaranayaa sawirka, fiidyow-qaadista iyo qoridda wararka iyo qoraalada kale ee warbaahinta. Waxaa sidoo kale lagu baadhayaa warbaahinta waxyaabaha lagu soo qaato. Xiisadaha marka lagu jiro ardeydu waxaay sameeyaan shaqooyin u gaar ah oo warbaahineed. Waxbarashada fahamka warbaahinta waxaa lagu adeegsanayaa qalabka sawir-qaadista iyo kombiyuutarada dugsiga. Qalab ardeygu uu leyahay uma baahna. Ardeyda fahamka warbaahintu waxaay booqanayaan goobaha warbaahinta, sida goobaha saxaafadda ama shirkadaha iyo bandhigyada.

Imtixaanka doorashadu labo qaybood ayuu ka koobanyahay: imtixaanka shaqada kooxda iyo imtixaanka shaqsiga. Imtixaanka kooxda shaqada ardeygu wuxuu ku muujinayaa inuu yaqaano sida loola shaqeeyo dadka kale. Imtixaanka kalida ah ardeygu wuxuu ku sameynayaa casharo qoraal iyo sawir ah.

Xoojinta fahmka warbaahinta waxaa lagu dhigan karaa dugsiyada hoose-dhexe ee Hiidenkivi iyo Vuoniitty.

## Muusiikada

Waxbarashada waxaa lagu tababaranayaa hees iyo tumidda qalabka muusiga, teknolojiyadda muusigana waxaa la baranaya iyadoo laga faa'idaysanayo soo saaridda halabuurka leh ee muusiga. Xooga waxaa la saaraysaa in musigada si wadajir ah loo soo saaro ama loo sameeyo, laakiin wuxuu ardeygu fursad u haystaa inuu xirfadihiisa gaarka ah iyo waxyaabaha uu xiiseeyo uu horumarin karo. Ardeydu waxaay tumayaan qalabka kala duwan ee muusiga, waxaay horumarinayaan soo jeedintooda muusiga waxaayna ka qaybqaadanayaan mashruucyada iyo bandhigyada kala duwan.

Imtixaanka doorashada waxaa ku jira casharo laxanka iyo ridhimka wuxaana ardeyga laga qaadi karaa imtixaan yar oo hees ama tumidda qalabka muusiga ah. Xoojinta muusiga waxaa lagu dhigan karaa dugsiyada hoose-dhexe ee Kruunahaa, Laajasalo, Pakila, Porolahti, Suutarila iyo Vuoniitty iyo dugsiga wadajirka ee Oulunkylä. Xoojinta muusiga ee iswidhishka ah waxaa bixiya dugsiga Kottby grundskola.

## Matalaadda iyo soo jeedinta farshaxanka

Xoojinta matalaadda iyo soo jeedinta farshaxanka waxaa lagu bartaa farshaxan-sawireedka, muusiga, farsamada gacanta iyo aqoonta matalaadda iyo soo jeedinta. Matalaadda iyo soo jeedinta farshaxanka waxaa lagu sameeyaa shaqooyin farshaxan oo gaar ah iyo mashruucyo wadajir ah. Ardeydu waxaay booqanayaan goobaha dhaqamada sida teaterka iyo muyuseyumyada. Wadashaqayn ayaa lala yeelanayaa hay'adaha dhaqanka iyo suugaanta ku shaqada leh ee kala duwan. Waxbarashada waxaa lagu xoojinayaa sannad walba maaddoyin kala duwan. Fasalka 7-aad waxaa lagu baranaa maaddooyinka kala duwan ee farshaxanka iyo suugaanta. Fasalka 8-aad waxaa xooga lagu saarayaa soo jeedinta iyo matalaada teaterka sidoo kale fasalka 9-aad waxaa xooga lagu saarayaa nooca farshaxanka iyo matalaadda ka midka ah ee ardeygu xiiseynayo.

Imtixaanka doorashada waxaa ku jira casharo farshaxan-sawireed, muusig, farsamada gacanta iyo awoodda soo jeedinta iyo matalaadda. Imtixaanka doorashada ardeygu wuxuu ku muujinayaa inuu wadashaqeyn sameyn karo.

Xoojinta matalaadda iyo soo jeedinta farshaxanka waxaa lagu baran karaa dugsiga hoose-dhexe ee Puistopolku.

## Farshaxanka qoob ka ciyaarka

Ardeygu wuxuu baranayaa qaabka uu isagu u dhaqdhaqaaqo, qoob ka ciyaarka oo farshaxan ah, wuxuu la shaqaynayaa koox wuxuuna tababaranayaa qaabka uu bandhig ugu sameynayo dugsiga iyo nawaaxigiisa xafladaha iyo munaasabadaha ka dhacaya. Ardeydu waxaay daawanayaan bandhigyo waxaayna booqanayaan muyuseyumyo, bandhigyo iyo hoosado shaqo. Farshaxanka qoob ka ciyaarka waxaa wadashaqayn lagula yeelnayaa dugsiyada kale iyo hay'adaha dhaqanka iyo suugaanta.

Imtixaanka doorashada ardeygu kaligii iyo koox yar oo 9–12 qof ay ku jiraan ayuu ku sameynayaa casharada ay macallimaddu ku hagto. Ardeygu wuxuu muujinayaa u diyaarsanaantiisa casharada dhaqdhaqaaqa u baahan iyo wadashaqaynta kooxyada.

Xoojinta farshaxanka qoob ka ciyaarka waxaa lagu baran karaa dugsiga hoose-dhexe ee Kruununhaa.

## Waxbarashada fahamka teknoolojiyada

Waxbaristu waxaay ku habboontahay dhammaan dadka xiiseynaya xalka dhibaatooyinka ee dabaqaadda u baahan, farsamada gacanta iyo aqoonta teknolojiyadda. Waxbarashada waxaa ka mid ah isticmaalka teknolojiyadda oo baaxad leh. Teknolojiyadda waxaa loo adeegsanayaa in maaddooyinka kala duwan ee sayinska iyo farshaxanka ah laysku geeyo: tusaale ahaan Kemiaa keittiössä- koorsooyinka laysku yidhaahdo waxaa lagu baranayaa kemistri, maaddada maareynta howlaha guriga iyo aqoonta teknolojiyadda.

Imtixaanka dootashada ardeygu wuxuu ku sameynayaa casharo dabaqaad leh oo loogu baahan karo tusaal ahaan inuu ardeygu fahamkiisa u adeegsado. Imtixaanka doorasahda waxaa ku jira sawir teknolojiyadaysan iyo qalin iyo warqadba.

Xoojinta fahmka teknolojiyadda waxaa lagu baran karaa dugsiga hoose-dhexe ee Aurinkolahti.

## War isgaasriinta

Xoojinta isgaarsiintu waxaay ku habboontahay dhammaan dadka xiiseynaya isgaarsiinta, soo jeedinta iyo matalaadda, teknolojiyadda aqoonta, qoraalka halabuurka leh iyo wadashaqeynta. Isgaarsiinta waxaa lagu tababaranayaa aqoonta isgaarsiinta, soo jeedinta iyo mataaladda iyadoo kali la yahay iyo iyadoo dadka lala wadaagayaba. Waxaa intaa dheer oo la tababaranayaa aqoonta akhriska warbaahinta. Ardeydu waxaay sameynayaan muuqaalo, xayaysiisyo iyo jaraa'iddo. Isla markaas waxaa la baranayaa teknolojiyadda aqoonta iyo isgaarsiinta.

Ardeyda isgaarsiintu waxaay u baxayaan dalxiisyo gaaban oo waxbarasho ah. Fasalka 9-aad ardeyda dhigata waxaay baranayaan isgaarsiinta muuqaalka ah.

Imtixaanka doorashada waxaa lagu qiimeynayaa aqoonta isgaarsiinta ee ardeyga.

Xoojinta isgaarsiinta waxaa lagu baran karaa dugsiga dhexe ee Vartiokylä.

Macluumaad dheeraad ah

edu.hel.fi/tervetuloakouluun